

OGGOLAANSHAHA BAARITAANKA COVID-19 EE DUGSIYADA DADWEYNAHA MILWAUKEE EE SANNAD-DUGSIYEDKA 2021-2022

Milwaukee Public Schools (MPS) ayaa u isticmaalaysa foomkan si ay u hesho oggolaanshahaaga siddii ilmahaaga looga baari lahaa COVID-19 iyo in lala wadaago xogta la ururiyey mas'uuliyiinta caafimaadka dadweynaha ee ay khuseyso.

Maxaa loo baarayaa?

Baaritaanku wuxuu gacan ka geysan doonaa yareynta faafitaanka bulshada ee COVID-19 iyo in la hubiyo in dugsiyadeennu yihiin deegaan waxbarasho iyo shaqo oo badbaado ama badqab leh. Baaritaanka ardayda ayaa ka caawin doonta degmada inay si dhakhso leh u aqoonsato kiisaska togan ee COVID-19, taas oo muhiim u ah ka hortagga in cudurku ka dilaaco dugsiya.

Waa maxay baaritaanku?

Oggolaanshahaaga ka bacdi, ilmahaagu wuxuu mari doonaa baaritaanka fayraska keena COVID-19 oo bilaash ah. Hadda barnaamijka baarista COVID-19 ee dugsiyada dadweynaha ee Milwaukee wuxuu u sameyn doonaa baarista fayraska PCR ee arday kasta oo muujinaya astaamaha COVID-19 inta uu dugsiya joogo. Ururinta muunada ama sheybaarka si loo baaro waxaa la sameynayaa in labada duleel ee sanko la geliyo suuf yar, oo la mid ah suufka dhegta lagu sifeeyo. Baaritaanku wuxuu dhici doonaa oo kaliya haddii waalidka/mas'uulka u oggolaansho bixiyo.

Sideen ku ogaan doonaa natiijoyinka baaritaanka?

Haddii ilmahaaga sheybaar lagaga qaaday dugsiya, waxaa lagu soo ogeysiin doonaa natiijada baaritaanka ama waxaa lagugu wargelin doonaa sida natiijada baaritaanka loo heli doono (tusaale ahaan: taleefan, qoraal, ama iimayl).

Maxaan sameeyaa markaan helo natiijoyinka baaritaanka ilmahaaga?

Haddii baaritaanku yahay mid togan, tan micnaheedu waa in fayraska laga helay sheybaarka ilmahaaga. Waxaad xiriir ama wadahal ku saabsan baaritaankan ka heli doontaa dugsiya ilmahaaga ama xirfadle tababaran. Waxaa lagu weydiisan doonaa inaad ilmahaaga kaxayaso (ama aadan u dirin ilmahaaga dugsiya) waxaana lagu siin doonaa macluumaad ku saabsan inaad ilmahaaga ku hayso guriga, la xiriirka bixiyaha adeega caafimaadkaaga, iyo marka ilmahaagu ku soo laaban karo dugsiya.

Haddii natiijoyinka baaritaanka ilmahaagu ay yihiin kuwo taban, tani waxay ka dhigan tahay in fayraska laga waayay sheybaarka ilmahaaga waqtigan. Waxaa lagu weydiisan doonaa inaad raacdo tilmaamaha uu bixiyay dugsiya ilmahaagu kadib natiijada baaristan.

MACLUUMAADKA XIRIIRKA - Waxaa buuxinaya waalidka/mas'uulka ama ardayga (haddii uu jiro 18 sano ama wixii ka weyn) - Fadlan Daabac			
Magaca Dambe ee Ardayga:		Magaca Koowaad ee Ardayga :	Magaca Dhexe
Ciwaanka Wadada/Jidka:	Magaalada:	Gobolka: WI	Lambarka Boostada:
Taariikhda Dhalashada (Bil/Maalin/Sanad):	Lambarka Aqoonsiga Ardayga:	Magaca Waalidka/Masuulka Sharci:	Email ama limaaylka Waalidka/Masuulka:

Markaan saxiixo hoosta, waxaan qirayaa ama cadeynayaa in:

- Inaan u saxiixay foomkan si xor ah oo ikhtiyaar ah, waxaana sharci ahaan la ii oggolaaday inaan go'aan u gaaro ilmaha kor ku xusan.
- Waxaan oggolahay in dugsiya ku wargeliyo ilmahaaga natiijoyinka baaritaanka.
- Waxaan oggolahay in ilmahaaga laga baaro COVID-19 markii loo baahdo oo aan fahansanahay in ilmahaaga la baari karo dhowr jeer.
- Waxaan oggolahay in ilmahaaga ay baaraan shaqaalaha dugsiya, shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee qandaraaska haysta, shaqaalaha Waaxda Caafimaadka ee Maxaliga ah iyo Qabaa'iilka, iyo/ama shaqaale kale oo tababaran sida dugsiya faray. Waxaan fahansanahay in haddii ilmahaagu u dhexeeyo da'da 14-17, waxaa la weydiin doonaa inay bixiyaan oggolaansho afka ah si loo baaro.
- Waxaan fahansanahay in foomkan oggolaanshuhu uu shaqaynayo illaa Luulyo/Julaay 31, 2022, haddii aanan qoraal ahaan ku wargelin maamulaha dugsiya ilmahaaga in aan ka noqday oggolaanshahaygii.
- Waxaan fahansanahay in natiijoyinka imtixaanka laga yaabo in lala wadaago dugsiya, degmada, iyo maamulada caafimaadka dadweynaha ee maxaliga, gobolka, iyo federaalka sida sharciyo oggol yahay.
- Waxaan fahansanahay in haddii aan ahay arday jira 18 sano ama ka weyn, ama haddii kale si sharci ah aan oggolaansho ugu heli karo daryeelkayga caafimaad, tixraacyada "ilmahaaga" loola jeedo aniga, waxaana laga yaabaa inaan saxiixo foomkan.

Booq bogga CDC (Xarunta xakamaynta cudurada) ee Karoona fayraska si aad u hesho macluumaad dheeraada oo ku saabsan cudurkan iyo badbaadinta adiga iyo qoyskaaga: www.cdc.gov/coronavirus.

SAXIIXA - Waalidka/mas'uulka ama ardayga (haddii uu jiro 18 sano ama ka weyn)

Taariikhda La Saxiixay

